

Sabti, Meey 21, 2022

Galab wanagsan dhamaan bahda waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Buffalo (BPS)

Toddobaadkii ina dhaafay, waxa uu ahaa wakhtiyadii ugu murugada badnaa iyo wakhtiyada ugu dhibka badnaa ee na soo mara haddi aanu nahay Dugsiyada Dadweynaha Buffalo. Waxaa nagu buuxsamay dhaawac aad u daran iyo murugo aan la macnayn karin, iyadoo ay sabab u tahay khasaaraha nafeed ee naxdinta leh oo aan wax lagu macnayn karo aanu lahayn tobanka qof ee quruxda badan ku dhinteen.

Nacaybka nooc kasta ha ahaadee waa sun oo aan la aqbali karin! Looma dulqaadan doono qaab kastaba, mid ka mid ah dugsiyadeena. Waxaan ku boorinayaa dhammaan shaqaalaha BPS, ardayda, qoysaska, iyo xubnaha bulshada inay soo sheegaan dhammaan fariimaha nacaybka ah, ee laga yaabo inay la kulmaan ama markhaati ka noqdaan. Waxaa muhiim ah in la fahmo in ka aamusnaanta ay tahay ka qaybqaadasho, waana in aynaan ka qaybqaadan xumaan iyo fal khalad ah. Codsiga ugu waa "haddii aad aragto ama aad wax maqasho... ka warbixi... si degdeg ah!"! Ha u istaagin oo ha rajayn in qof kale soo sheegi doono. **WAA INAAN ANAGU NOQONAA ISBEDELKA AAN RABNO INAAN ARAGNO!** Mustaqbalka caruurteena ayaa u baahan tan!

Waxa kale oo aanu markhaati ka nahay, usbuucan u dambeeyay, naxariista iyo isu-keenid aan kala go 'lahayn, "Magaaladeena **Deriska** Wanaagsan" oo aan weligay hore u arag! Tani waxay dhammaanteen ina siinaysaa rajo wanaagsan berrito, xitaa xilligan rajo-beelka qotada dheer.

Waa inaan idinla wadaagaa inaan ku faani karo shaqaalaha BPS. Mid kasta! Waxaad isu timaaddeen usbuucan ina dhaafay si aad: u daryeeshaan, wax bartaan, oo aad taageertaan ardaydeena quruxda badan, adinkoo la dhibtoonaya murugadiina ku aadan masiibadan. Xirfad-yaqaanimo iyo muujinta walwalka dhabta ah ee aan goob joog u ahaa, ayaa ugu fiican fasalka! Mahadsanidiin!!

adkeysiga, kalsoonida, iyo geesnimada. Waan ogahay in usbuucan u dambeeyay uu ahaa mid jahawareer, cabsi leh, lagana yaabo inuu kugu kiciyay dareen walaac ah... si sax ah! Laakin, iyadoo ay taasi jirto waxaad waddankeena tusteen in WAXBARASHADU AY MUHIIM TAHAY iyo in aynaan ogolaan falalka guracan ee fulaynimo iyo nacayb ah inay carqaladeeyaan himilada iyo aragtida fog BPS! Aad ayaan kuugu mahadcelinayaa. Waxaan ognahay inaad rajo iyo riyo u leedahay mustaqbal ifaya oo wax soo saar leh, annaguna haddaanu nahay barayaasha noloshada waxaan qaadanaa doorkeena si dhab ah, inaan ka caawino mid kasta oo idinka mid ah inuu gaaro dhammaan yoolalkaaga.

Ugu dambayntii, ku socota bulshadeena shaqo wadaaga ee ku salaysan dugsiyada; waxaad nala garab istaagteen, idinkoo macneynaya iskaashiga dhabta ah! Waad ku mahadsan tahay buuxinta wacitaanka waajibbaadka iyo siinta taageero deeqsinimo iyo fikir leh carruurta iyo shaqaalaha dugsiyadeena. ... WELI WANU SARE KACNAA!

Runtii adigaa leh,

Dr. Tonja M. Williams, Kormeeraha Guud ee Ku Meelgaarka ah,

Og: Xubnaha Guddiga Waxbarashada